

Waxa la debcinayaa xeerarka ku saabsan in tijaabo la iska qaado inta aan loo dhoofin Svalbard

Dawladdu waxa ay hadda debcinaysaa xeerarka loogu talagalay safarrada lagu tegayo Svalbard.

Wax-ka-beddelladan ayaa keenaya in dadka si rasmi ah u deggan Svalbard, dadka si buuxda u tallaalan iyo dadka uu covid-19 ku dhacay, ay hadda laga bilaabo u baahnayn in ay tijaabo iska qaadaan ka hor intaanay u dhoofin Svalbard. Wax-ka-beddelkani wuxuu safarrada u dhexeeya berriga waddanka iyo Svalbard u fududdaynayaa dadka si rasmi ah u deggan halkaas iyo dadka dalxiis u aadaya.

- In hadda dadkaas laga dhaafo shardiga ku saabsan in tijaabo la iska qaado intaan loo dhoofin Svalbard, waxa ay u wacan tahay dadka deggan jasiiradahaas, guud ahaan ganacsiga iyo weliba ganacsiga dalxiiska iyo safarrada. Si kastaba weli lama gaadhin wakhtigii si buuxda loo joojin lahaa nidaamka tijaabo-qaadista. Waxa xadiddan awoodda adeegyada caafimaadka ee Svalbard, islamarkaana is-qaadsiinta cudurka ee kordhaysa iyo dadka xanuun dartii shaqada uga maqan oo bata ayaa halkaas ku keeni kara dhibaatooyin ka badan inta soo gaadhi karta berriga, ayay tidhi wasiirka caafimaadka iyo daryeelka Ingvild Kjerkol.

Sannadkii hore kirismaska ka hor, ka dib markii nooca omikroon yimi, ayaa dib loo soo rogay shardi ku saabsan in dadka u dhoofaya Svalbard ay tusaan shahaado muujinaysa in ay tijaabo cudurka laga waayey iska qaadeen ka hor intaanay dhoofin. Waxa hadda la oggolaanayaa in dadka caddayn kara in ay si buuxda u tallaalan yihiin ama in covid-19 ku dhacay, aanay hadda laga bilaabo u baahnayn inay keenaan shahaado noocaas ah ka hor intaanay u dhoofin Svalbard. Dhammaan dadka yimaada Svalbard, waxa weli laga rabaa inay SARS-

CoV iska baadhaan xilli ka mid ah 24-ka saacadood ee u horreeya ka dib marka ay soo galaan Svalbard.

– Waan ku faraxsanahay in bulshada Svalbard iyaguna ay qayb ka helaan debcinta hadda lagu samaynayo tallaabooyinka xayiraadaha ah. Iyadoo ay sidaas tahay, waxa haddana bulshada ku badan is-qaadsiinta cudurka, islamarkaana waxa nugul heeganka ka jira Svalbard. Taas darteed waa inay weli sii jiraan qaar ka mid ah xayiraadaha ka jira Svalbard ilaa go'aan dambe, ayay tidhi wasiirka caddaaladda iyo heeganka Emilie Enger Mehl.

Go'aanka ku saabsan ka dhaafitaanka lagu sameeyay shardiga tijaabada la iska qaadayo dhoofitaanka ka hor waxa waxyaalaha lagu saleeyay ka mid ah talooyin laga helay Agaasinka Caafimaadka.

Wax-ka-beddelladan waxa la dhaqangelinayaa 1-da Febraayo saacadda 23.00.